# Minneapolis Homes: Access Down Payment Assistance Program

## Minneapolis Homes: Barnaamijka Gargaarka Lacagta Horudhaca Ah Tilmaame

1. **Soo Koobidda Barnaamijka :**

   **Minneapolis Homes:** waxa ay dadka guryaha iibsanaya siiyaan gargaarka lacagta horudhaca ah si ay ugu iibsadaan guri ay ku noolaanayaan.

2. **Deyn Qaatayaasha Ka Soo Baxa Shuruudaha:**
   - Deyn qaataha waa inuu dhameystiraa Fayo Qabka Waxbarashada iyo Maaliyadda ka hor inta aanu sixiixin Heshiiska Gadashada.
   - Waa in ay tahay markii ugu horeysay oo deyn qaatuhu guri iibsanayo  ama gurigiisii laga xaraashay; guriga ugu horeeya qofka waxaa lagu tilmaamaa qof horay guri uu degan yahay aan u yeelan.
   - Deyn qaatuhu waa inuu leeyahay Lambarka Canshuur Bixiyaha (ITIN) iyo Lambarka Bulshada (SSN)
   - Dakhliga deyn qaataha kama badnaan karo 80% ee heerka faqriga (AMI).   Dakhliga dhamaan dadka ku nool oo da'doodu ka weyn tahay 18 jir haddii lagu magacooda guriga lagu qoraayo iyo haddii kale ama ay waajib ku tahay in ay deynta guriga wax ka bixiyaan, waa in la xaqiijiyaa dakhligooda oo ay ka mid tahay dakhliga guud ee soo gala sanadka.
   - Dhamaan dadka bixinaya lacagta caddaanka ah waxaa loo gudbinayaa maamulayaasha oo isticmaalaya barnaamij ay magaaladu ogolaatay.
   - Waa in deyn qaatuhu ku daraa lacagta guriga uu ku gadanayo ugu yaraan $500.
   - Saamiga lacagta horudhaca ah iyo lacagta ugu yar ay noqotaa 15% iyada oo  saamiga deynta oo lala barbardhigay dakhliga uu noqdaa 50%.

3. **Shuruudaha Guryaha:**
   - 1-4 qol guri ka kooban oo gooni u taagan, ama dhinaca isku haya (townhome) ama dhisme kuwada yaal (condominium) taasoo ku taal xuduudda Magaalada Minneapolis.
   - Ma jiro lacag ku xadidan qiimaha guriga.
   - Iibsadaha guriga waa inuu degan yahay guriga 60 maalmood ka dib marka guriga laga gado.
   - Guriga aad iibsaneyso waa in ay shuruudihiisa la mid yihiin in qofku guriga deganaanayo muddo 10 sano ah.

4. **Qodobada Deynta:**
   - Deynta ugu badan ee loo ogol yahay dakhliga codsadaha waa inuu noqdaa 60% AMI yar oo noqonaya $20,000.
     - Isaga oo ah mid wax laga bedelo 3dii sano ee kasta uuna ogolaado madaxa CPED si loo gaaro 6% ee heerka dhexe ee qiimaha gadashada ee Degmada hennepin.
   - Deynta ugu badan ee qoyska lo ogol yahay waxa ay noqoneysaa 61% ilaa 80% ee AMI taasoo ah $10,000
     - Isaga oo ah mid wax laga bedelo 3dii sano ee kasta uuna ogolaado madaxa CPED si loo gaaro 3% ee heerka dhexe ee qiimaha gadashada ee Degmada hennepin.
   - Dulsaarkuna yahay eber.
   - Ma jirto lacag bil kasta la bixinayo.
   - Deynta waa mid dib loo bixinayo 100% marka ay dhamaato mudada deynta koowaad AMA dib loo maalgelin karo AMA dhamaadka 30 sano dib loo dhigi karo.
   - Deynta waxaa laga yaabaa in qole kale lagu wareejin karo taasoo qeyb ka ah dib u maalgelinta deynta aasaasiga ah. Deyntaas waxaa loo tixgeliyaa "Deyn Gaar Ah" sida uu dhigayo sharciga Minneasota 58.13.

5. **Isticmaalka Dhaqaalaha:**
   - In lagu bixiyo lacagta horudhaca ah, oo ay ka mid tahay qiime jabinta iyo yareynta Lacagta aasaaska ah.
   - In lagu bixiyo lacagta saxiixa guriga (closing cost)
   - Qeyb kasta oo deynta ka mid ah ee aan loo isticmaalin lacagta horudhaca ah ama kharashka saxiixa iibsashada oo dib loogu celinayo Magaalada Minneapolis, iyada oo la yareynayo haraaga soo hara ee deynta.   Deynta looma isticmaali karo lacag dib loogu celiyo deyn qaataha ama fal ganacsi ah oo ka horeeyey ama lacag caddaan ah la siiyo iibsadaha marka uu saxiixayo iibsashada guriga.
   - Lacagta oo la sii xajisto waxa u suurogaleysaa deyn qaatayaasha horay loogu ogolaaday deynta koowaad oo dhameystiray waxbarashada guryaha iyo fayo qabka maaliyadda.
     - Dhaqaalaha oo la sii xajisto waa mid suurogal ah ilaa 90 maalmood.
     - Dhaqaalaha oo la xajisto ma aha mid ku xiran deyn qaataha oo ogolaada ama saxiixa hehsiiska iibka.

6. **Fasalada Lahaashaha Guryaha iyo Fayo Qabka Maaliyadda ee Laga Doonayo Guri Iibsadayaasha:**
   - Iibsadayaasha waa in ay dhameystiraan Fasalada Lahaashaha Guryaha iyo Fayo Qabka Maaliyadeed™ oo ay bixinayaan Minnesota Homeownership Center, 651-659-9336 ama www.hocmn.org), Framework® (fasal barta internetka lagu qaato ee waxbarashada iibsadayaasha ee www.hocmn.org), ama fasal kale oo waxbarashada Iibsadayaasha oo HUD ay manhajkooda ogolaatay.
   - Dhameystirka waxbarashada iibsashdayaasha waa mid dheeraad ku ah la talinta fayo qabka maaliyadeed ee qof ahaaneed.  Labada waa in la dhameystiraa oo shahaadada qaadataa ka hor inta aadan codsan Mineapolis Homes: Access.

7. **Shuruudaha Maalgelinta Deynta Aasaasiga Ah**:
   - Deynta waxaa laga yaabaa in lagu xiriirin karo deyn kale oo leh dulsaar go'an ee FHA, VA, Fannie Mae, ama uu ceynis geliyey ama Freddie Mac, ama uusan ceymis gelin , ama deyn aan dulsaar laheyn waxaa inta badan ay hay'aduhu u tixgeliyaan  "A" ama deyn bixiyaha aasaasiga ah.
     - Barnaamijka ma ogola wax ka bedeldelka heerka dulsaarka deynta
   - Waxaa kale oo suurogal ah in deynta la raacin karo heshiis lagu maalgeliyo oo ay ogolaadaan kuwa guryaha dhisa, marba haddii kuwa guryaha dhisa ay yihiin kuwo aan faa'iido doon aheyn oo aan sii iibeyn heshiiska iyaga oo aan ogolaasho qoraal ah ka helin Magaalada.   Heshiiska marka dambe guriga lagu iibsanayo waa in uu yahay mid ay ogolaatay Magaalada ka hor inta uusan iibsaduhu ka qeynb qaadan barnaamijka Deynta
   - Deyntan looma isticmaali karo in lagu iibsado adeegyada deyn bixiyayaasha kale.
   - Minneapolis Homes: Barnaamijka Access waxaa suurogal ah in lala isticmaalo gargaaarka ee lacagta hordhaca ah oo hay'ad kale aad ka heshay ama barnaamijyada lagula wadaagayo qiimaha ku kordha guriga  si loo siiyo fursad balaaran fursadaha deyn qaatayaasha/ loona sugo in ay   guriga iibsan karaan.

8. **Sugitaanka Deynta**
   - Deyn qoraal ah iyo Deynta Guriga waxa uu mid walba goonidiisa loogu qaadan karaa lacagta deynta.
   - Waxaa laga yaabaa in deynta lagu heli karo barnaamijyo kale iyada oo hantida la dhigayo ama lagu xirayo.
   - Waajib ma aha in aad leedahay ceymiska milkiyadda guriga.
   - Ma jiro qodob deynta guriga ka mid ah oo waajib ka dhigeysa in mulkiiluhu heysto ceymiska masiibooyinka.

9. **Luqad Lagu Tilmaamo Masiibooyinka**
   - Haddii ay dhacdo in deyn qaatuhu ama hay'adda uu ka qaatay, iyaga kaliya ayaa u madax banaan go'aanka ay gaarayaan, ka dib marka ay tixgeliyaan yareynta khatarta, ay dhacdo masiibo dabiici ah, oo ay ka mid tahay laakiin aan ku koobneyn dhimashada deyn qaataha ama bukaan muddo dheeraad ah oo qof qoyska ka tirsan oo noloshiisu ku tiirsan tahay deyn qaataha, taasoo saameyn la taaban karo ama si joogta ah dhibaato ugu geysaneysa awoodda qofku ku bixin karo Deynta Qoraalka ah iyo Deynta oo ay waajib ku noqoto in ay iibiyaan hantida qiime ka yar lacagta lagu leeyahay guriga ee Deynta Qoraalka ah iyo Deynta Hantida, qeybta soo harta ee Deynta Qoraalka ah iyo Deynta Hantida ee aan laga bixin karin qiimaha guriga lagu iibiyo waa laga deynayaa iibka (looma xayirayo).

**10. Sidee ayaa loo Codsan Karaa**

- Si loo ogaado in aad shuruudaha ka soo baxday iyo sida dhaqaalaha loo heli karo, codsadayaasha daneynaya waxa ay la soo xiriiraan maamulaha deynta:

BuildWealth MN
2121 Plymouth Ave N
Minneapolis, MN 55411
612-877-4182 office
612-436-5418 fax
info@buildwealthmn.org

NeighborWorks Home Partners
1930 Glenwood Ave
Minneapolis, MN 55405
651-292-8710 office
651-292-0473 fax
hello@nwhomepartners.org